REPUBLIC OF SOMALILAND

The President

REF: JSL/M/DEC/249-27/32002

DATE; 22nd May, 2002

# DECREETO MADAXWEYNE NO: 09/2002

Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland

**Markuu helay:** Go'aanka GW/KF-16/213/2002 ee 03/03/2002 uu Golaha Wakiiladu ku ansixiyey Xeer Lr. 22/2002 ee Xeerka Jinsiyadda iyo go'aanka Golaha Guurtida ee GG/JSL/KAL-Fadhi-16/Go'-4/03/2002 ee 06/03/2002

**Markuu arkay:** Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

**Wuxuu**

Soo saarayaa Dekreetadan oo lagu baahinayo dhaqan-galka Xeerka Jinsiyada Xeer No: 22/2002.

Waxaana lagu soo saari doonaa faafinta rasmiga ah ee dawladda.

Allaa Mahad Leh.

REPUBLIC OF SOMALILAND President

Daahir Rayaale Kaahin
Madaxweyne

# Jamhuuriyadda Somaliland
# GOLAHA WAKIILADA

GW/KF-16/ 213 /2002 03/03/2002

## GO'AAN ANSIXIN XEERKA JINSIYADDA (Xeer Lr. 22/2002)

### GOLAHA WAKIILADA JSL

| | |
|---|---|
| **Markuu Arkay:** | Qodobka 4aad iyo 39aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland. |
| **Markuu Dhagaystay:** | Soo jeedinta Guddiga Arrimaha Gudaha ee Golaha wakiilada ee la xidhiidha mashruuc-sharciga Jinsiyadda. |
| **Markuu Tixgeliyay:** | Baahida loo qabo xilligan dejinta Xeer lagu maamulo arrimaha Jinsiyadda Somaliland oo qayb ka ah taabagalinta xuquuqda muwaadinka ee coddaynta doorashooyinka. |
| **Markuu Darsay:** | Nuxurka mashruuc-sharciga, kuna saleeyay dhaqanka, diinta, curfiga duwaliga ah iyo duruufaha dhaqan-dhaqaale ee ina saameeya. |
| **Markuu u Codeeyay:** | Ansixinta Mashruuc-sharciga Jinsiyadda, fadhigii 03/03/2002 oo ay goob-joog ahaayeen 54 Mudane. |

## WUXUU

Cod aqlabiyad ah (39 cod) oo gacan taag ah ku ansixiyey **"Xeerka Jinsiyadda (Xeer Lr. 22/2002)"**, [w]alka ay ka diideen 4 Mudane, 10 Mudane oo kalena ka aamuseen, Gudoomiyuhuna aanu cod bixin sida caadada ah.

**Allah Mahad Leh**

**Maxamed Xuseen Cisman**
**XOGHAYAHA GUUD G/WAKIILADA**

**C/qaadir X. Ismacil Jirdeh**
**K/S GUDOOMIYAHA G/WAKIILADA**

Jamhuuriyada Somaliland
GOLAHA GUURTIDA

Republic of Somaliland
COUNCIL OF ELDERS

REF: GG/JSL/KAL-FADHI-16/GO'-4/03/2002

DATE: 06/03/2002

UJ: GO'AAN XEER NO: 22/2002.

FADHIGII MAANTA OO BISHU 06/03/2002 oOO U GUDDOOMINAAYEY GUDDOOMIYE KU XIGEENKA KOWAAD EE G/GUURTIDDA MUDANE SH. AXMED SH.NUUX FURRE,OO LAGA DOODAY XEERKA JINSIYADA OO HORE LOOGU GUDBIYEY GUDDIDA SHURUUDDA EE G/GUURTIDDA SI AY DIB U EEGIS UGU SAMEEYAAN MAR KALE KU SOO CELIYEY GOLAHA IYAGOO SOO JEEDIYEY TALLAN HOOSE KU QORAN:

MARKII LA ARKAY QODDOBA 61NAAD EE DASTUURKA FARQADIISA 2AAD.
" " " " 77NAAD " " " 1AAD
MARKU ARKAY TALO SOO JEEDINTA GUDDIGA SHURUUCDA & TALO BIXINTOODA WUXUU GOLUHU ANSIXIYEY XEERKA NO 22/2002 oo Golaha Wakiiladdu hore UGU SOO GUDBIYEEN IYADOON WAX KA BEDDEL LAGU SAMAYN.
KORAAMKA GOLAHA GADHIYEY 43 MUDANE CODBIXINTUNA SIDAN HOOS KU QORAN AYEY U DHACDAY:

| OGGOL | DIIDAN | AAMUS |
|---|---|---|
| 28 Mudane. | 6 Mudane | 9 Mudane. |

ALLA MAHAD LEH.

SH.AXMED SH.NUUX FUURRE.
GUDDOOMIYE KU XIGEEN KA 1AAD
EE G/GUURTIDDA QARANKA J.S.L.

CABDILAAHI IBRAAHIM HABBANE
XOGHAYAHA GUUD EE G/GUURTIDDA JSL.

# Jamhuuriyadda Somaliland
# <u>GOLAHA WAKIILADA</u>

## <u>XEERKA JINSIYADDA (Xeer Lr. 22/2002)</u>

### GOLAHA WAKIILADA JSL

**Markuu Arkay:** Qodobka 4aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

**Markuu Tixgeliyay:** Baahida loo qabo xilligan dejinta Xeer lagu maamulo arrimaha Jinsiyadda Somaliland oo qayb ka ah taabagalinta xuquuqda muwaadinka ee u coddaynta doorashooyinka.

**Markuu Darsay:** Nuxurka mashruuc-sharciga, kuna saleeyay dhaqanka, diinta Islaamka, curfiga duwaliga ah iyo duruufaha dhaqan-dhaqaale ee ina saameeya.

### WUXUU ANSIXIYEY XEERKAN:

#### Qodobka 1aad
#### Qeexidda Erey-bixinta

**<u>Muwaadin:</u>** Waxa loola jeedaa qofka ka ISIRRAN dadkii deganaa gayiga Somaliland 26 Juun 1960kii iyo ka hor iyo qofka sifa sharci ah lagu siiyey jinsiyadda Somaliland.

**<u>Laaji:</u>** Waxa loola jeedaa qofka loo aqoonsado qaxootinimo ee ku sugan dal uu marti ku yahay.

**<u>Ajanabi:</u>** Waxa loola jeedaa qof kasta oo aan ahayn muwaadin Somaliland ah.

**<u>Qaan-gaadh:</u>** Waxa loola jeedaa muwaadin kasta oo da'diisu gaadhay 15 sano iyo ka badan.

**<u>Caruur:</u>** Waxa loola jeedaa muwaadin kasta oo da'diisu ka yar tahay 15 sano.

**<u>Guddiga:</u>** Waxa loola jeedaa Guddiga Qaranka ee Jinsiyadda ee Madaxweynuhu magacaabo.

**Aabe-laawe:** Waxa loola jeedaa ilmaha aan la aqoonsan aabihii balse leh hal waalid oo la yaqaan (single parent) oo ah hooyada dhashay oo keliya .

#### Qodobka 2aad
#### Muwaadinimada u Dhalashada ah

1) Waxa Muwaadin dhalad Somaliland ah qof kasta oo uu dhalay Aabbe ka Isirran dadkii deganaa dhulka Somaliland 26 Juun 1960kii iyo ka hor.
2) Muwaadinka dhalad Somaliland ahi wuxuu qaadan karaa jinsiyad dal kale (dual nationality) iyadoo aanu luminayn muwaadinimadiisii Somaliland.

3) Qof kasta oo qaan-gaadh ah oo uu dhalay muwaadin Somaliland ah ee ku nool dal shisheeye ama haysta jinsiyad dal kale ama laaji ku ah wuxuu muwaadinimada Somaliland qaadan karaa marka ugu horaysa ee uu soo galo dalka Somaliland, haddii aanu iskii uga tanaasulin.

**Qodobka 3aad**
**Hellidda Aqoonsiga Muwaadinimada.**

1) Aqoonsiga caddeynta Muwaadinimada Somaliland waxa lagu kasban karaa marka codsaduhu la yimaado arrimahan:

a) Caddayn uu Maxkamadda horteeda ka bixiyey Caaqil ka diiwan-gashan Wasaaradda Arrimaha Guduhu ee ardaaga uu ka soo jeedo codsaduhu.
b) Soo buuxiyo foomka loogu talagalay oo uu soo saarayo xafiiska Jinsiyaddu, isla markaana saxeexo.
2) Aqoonsiga muwaadinimada Somaliland wuxuu ahaanayaa mid isku mid ah oo leh tiro taxane ah oo ka diiwaan-gashan Wasaaradda Arrimaha Gudaha, waxana saxeexaya Gudoomiyaha Gobolka awoodda u leh.
3) Qaabka, midabka, qoraalka lagu muujinayo aqoonsiga iyo ogolaanshaha daabacaadiisa iyo maamulkiisa waxa xeer nidaamiye ku soo saaraya Wasiirka Arrimaha Gudaha.

**Qodobka 4aad**
**Ogolaanshaha Muwaadinimo ee Qof Ajanabi ama Qaxooti ah**

1) Qofka ajanabiga ah ama qaxootiga ah ee sifo sharci ah ku jooga dalka Somaliland ee soo codsada muwaadinimo Somaliland; waxa la siin karaa marka uu buuxiyo shuruudahan:
   a) In codsaduhu qaan-gaadh yahay.
   b) In ugu yaraan 10 sano si sharci ah oo xidhiidh ah u deganaa dalka Somaliland.
   c) Inuu ku sifoobay dhawrsanaan iyo dhaqan wanaag.
   d) Inaanu ku dhicin xukun ciqaabeed oo maxkamad horteed kaga cadaadey, kana qayb qaadan fal ka dhan ah Qaranimada Somaliland.
   e) Inuu ahaa cashuur-bixiye mudadii uu dalka deganaa.
   f) Inuu bixiyo caddeyn uu kaga tanaasulayo jinsiyaddiisii hore, isla markaana maro dhaarta ku xusan qodobka 6aad ee Xeerkan.
2) Qofka ay dhashay hooyo muwaadin Somaliland ah ee la xaqiijiyo inuu yahay aabe-laawe, ee soo codsada muwaadinimada Somaliland, waxa la siin karaa muwaadinimada marka uu buuxiyo shuruudaha ku xusan farqadda 1aad ee qodobkan.

**Qodobka 5aad**
**Habka Loo Bixiyo Ogolaansho Muwaadinimo**

1) Ogolaanshaha muwaadinimo ee ku sheegan qodobka 4aad waxa bixinaya Madaxweynaha oo Degreeto ku soo saaraya, marka uu dhagaysto talada Guddiga Qaranka ee Jinsiyadda oo ka kooban 12 xubnood oo Golaha Wasiirada ah oo uu gudoomiye u yahay Wasiirka Arrimaha Guduhu.
2) Xubnaha Guddiga jinsiyaddu waa inay yihiin muwaadiniin ku sifoobay daacadnimo, kana kooban bulshada degaanada Somaliland.

**Qodobka 6aad**
**Dhaarta**

1) Go'aanka ogolaansho muwaadinimo ma ansaxayo haddii aanu codsaduhu ka tanaasulin jinsiyaddiisii hore ama uu dal kale hoos tago ama aanu marin dhaartan: **"WAXA IGU WALAAHI AH, IGU BILAAHI AH, INAAN DAACAD U NOQONAYO DALKA SOMALILAND OO AAN ADEECAYO DASTUURKA IYO QAWAANIINTA SOMALILAND, SI BUUXDANA UGA TANAASULAY JINSIYADAYDII HORE"**
2) Codsaduhu wuxuu ku hor dhaaranayaa Gudoomiyaha Gobolka awoodda u leh, iyadoo uu dhaarta u laqimayo garsoore maxkamadda degmada ka tirsan.

**Qodobka 7aad**
**Sida Lagu Waayayo Muwaadinimada**

Muwaadinimada Somaliland waxa lagu waayi karaa:-

1) Marka qofku iskii uga tanaasulo ee uu qaato jinsiyad kale.
2) Qofka oo aqbala shaqo Dawlad kale ama ku biira ciidan dawlad kale oo wax u dhimaysa Qaranimada Somaliland ee diida inuu shaqadaas kaga baxo wakhtiga dawladda Somaliland u qabatey.
3) Muwaadinimada lagu helay sida ku sheegan qodobka 4aad waa laga noqon karaa marka Guddiga Qaranka ee Jinsiyaddu ku qanacdo in qofkii la siiyay aanu istaahilin ama uu jabiyo shardi ka mid ah shuruudihii lagu siiyey.
4) Haddii ay cadaato in laga been sheegay caddeymihii lagu bixiyey muwaadinimada, waa laga noqonayaa ogolaanshihii, ciddii been-abuurka samaysayna dembiga ayaa lagu oogayaa.
5) Ka noqoshada ogolaansho muwaadinimo waxa lagu soo saarayaa Degreeto Madaxweyne marka uu dhagaysto tallo soo jeedinta Guddiga Qaranka ee Jinsiyadda.

**Qodobka 8aad**
**Dib-U-Helid Muwaadinimo**

1) Qofka lumiyey muwaadinimada Somaliland ee mar kale soo codsada inuu la soo noqdo; waa loo ogolaan karaa haddii uu buuxiyo shuruudaha ku xusan qodonka 4aad ee Xeerkan.
2) Dib-u-ogolaanshaha muwaadinimo waxa lagu saarayaa Degreeto Madaxweyne marka uu dhageysto talada Guddiga Qaranka ee Jinsiyadda.

**Qodobka 9aad**
**Gabadha Guursata Ajanabi**

1) Gabadha ajanabiga ah ee guursata nin muwaadin ah waxay helaysaa muwaadinimada Somaliland, waanay haysan kartaa xataa haddii la furo, haddii aanay iskeed uga tanaasulin.
2) Gabadha muwaadin ah ee guursata nin ajanabi ah, way waayaysaa muwaadinimadeedii haddii ay qaadato jinsiyadda ninkeeda.
3) Gabadha muwaadin ah ee uu qabo nin lumiyey muwaadinimada Somaliland ee qaatay jinsiyad kale, way luminaysaa muwaadinimadeedii haddii aanu ninku laaji noqon.
4) Gabadha lumisay muwaadinimada Somaliland guur dartii dib ayay u heli kartaa haddii ay la timaado sifaha xeerkani tilmaamayo.

## Qodobka 10aad
## Caruurta

1) Caruurta aan qaan-gaadhin ee aabahood helay ama lumiyey ama dib u helay muwaadinimada Somaliland , mar kasta waxay la xeer yihiin tan aabahood.
2) Ilmuhu marka uu qaan-gaadho wuxuu dalban karaa aqoonsiga muwaadinimada.

## Qodobka 11aad
## Ilmaha ku jira Duruuf Gaar ah

Waxa ogolaansho muwaadinimo la siin karaa ilmaha ku dhashay geyiga Somaliland oo aan la aqoon waalidkiisa, waxana arrintan u soo dacwoon kara cidda ilmaha haysa ama xanaanaysa.

## Qodobka 12aad
## Tir-tirid

Waxa la tir-tiray xeer kasta oo ka soo hor jeeda ama aan la socon Karin xeerkan.

## Qodobka 13aad
## Xeer-nidaamiyaha dhaqan-galinta Xeerka

Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Guduhu markuu la tashado Guddiga Qaranka ee Jinsiyadda wuxuu soo saarayaa xeer-nidaamiye lagu dhaqan-galinayo Xeerkan.

## Qodobka 14aad
## Dhaqan-galka

Xeerkani wuxuu dhaqangelayaa marka uu saxeexo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland, ansixinta Baarlamaanka dabadeed.

**DHAMAAD**

**Maxamed Xuseen Cisman**
**XOGHAYAHA GUUD GOLAHA WAKIILADA**

**C/Qaadir X. Ismaciil Jirdeh**
**K/S GUDOOMIYAHA G/WAKIILADA**